



# **Wax ka Baddalada Adeegga Cuntada iyadoo Cimiladu Isbaddalayso, Waxbarashada Onlaynka ah way Sii Socon**

**22 ka Oktoobar, 2020**

Qoysaska PPS ee Sharafta leh,

Ku dhawaaqidda in Dugsiyada Dadwaynaha Portland ay kordhinayaan muddada Waxbarashada Onlaynka ah ee Dhammaystiran ilaa la gaarayo 28 ka Janaayo, waxaanu doonaynaa inaad ogaato isbaddalada ku soo socda adeeggeena cuntada iyadoo aanu la jaanqaadayno cimilada qabow iyo maalmaha sidii hore ka gaagaaban ee soo foolka leh.

Waxaanu joojin doonaa adeegyada Dugsiyada Dhexe ee Clarendon, Sacajawea iyo Harriet Tubman kaqaybqaadashada oo hoosaysa darteed. Maalinta ugu dambaysa adeegga saddexdan goobood waxay noqon Jimcaha, 30 ka Oktoobar. Qoysaska booqanayey goobahan wixa lagu boorinayaa inay booqdaan mid kamid ah goobaha cuntada PPS ee kale ee u dhaw ama codsadaan in cuntada guriga loogu keeno.

**Laga bilaabo 2 da Noofambar, goobaha cuntada ee adeegga qabso oo soco waxay furnaan laga  
bilaabo 3 ilaa 4:30 g.d. Isniin, Arbaca iyo Jimce kasta.** Dugsiyada qaar ayaa goobtooda cunto qaybinta kambaska u baddali doona si shaqaalaha dhaxanta iyo roobka looga ilaaliyo. Si aad u aragto liiska dhammaystiran ee goobaha cuntada, fadlan booqo [websaytka Goobaha Nafaqada Muddada Waxbarashada Onlaynka ah.](#)

Ugu dambayn, waxaanu dib u furaynaa helitaanka cuntada guriga la keeno, oo ah adeeg loogu talogalay qoysaska PPS ee aan u dhawayn goob cunto lagu bixiyo ama kaalmo u baahan helitaanka cuntada. Si aad u codsato adeegga cunto u keenista, fadlan [buuxi foomka codsiga](#). Wixaanu sii wadi qiimaynta awoodda Adeegyada Cuntada iyo waaxaha Gaadiidka waananu kula socodsiin wixii aanu isbaddal ku samayno adeeggayaga.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo kusaabsan adeeggayaga cuntada, fadlan nagala soo xiriir [nutritionservices@pps.net](mailto:nutritionservices@pps.net). Mahadsanid!

Adeegyada Nafaqada PPS